HESHIISKA DUGSIGA- GURIGA

Dugsigan Slough iyo Eton wuxuu aqoonsan yahay iskaashi u dhexeeya guriga iyo dugsiga in uu yahay muhiim si loo hubiyo guusha arday kasta.

Haddaba si loo gaaro natiijada ugu wanaagsan ee suurto galka ah ee ardayda, waxaa la doonayaa in ardayda ay oggolaadaan:

- in si joogta ah ay u yimaadaan iyo is-xaadirinta waqtiga diiwaangelinta iyadoo uu la imanayo niyad waxbarasho sax ah.
- in ay u xidhaan dharka dugsiga si sax ah lana yimaada maalin kasta qalabka saxda ah.
- In ay noqdaan danjirayaasha u wanaagsan ee dugsiga mararka booqashooyinka sii socd iyo soo noqod iyo sidoo kale safar ama booqasho kasta.
- Waa in ay si fiican u dhaqmaan fasalka gudaha iyo dibedda ayna ilaaliyaan waxyaabaha dugsiga uu ka filayo.
- Waa in ay muujiyaan xushmad iyo daryeelka dadka kale iyo hantidooda.
- Waa in arday walba uu masuul ka yahay dhammaan wixii uu leeyahay iyo in aan Iskuulka la keenin waxyaabaha qaalliga ama lagu soo iibiyay lacag badan.
- Waa in ay daryeelaan buugga (planner) ayna rikoord gareeyaan dhammaan faahfaahinta homework ama shaqada-guri ee loo direy.
- Waa in ay dhawraan waqtiyada kama dambeysta ah ee loogu talay galay keenista wixii homework ah ee loo direy.
- Waa in ay si firfircoon uga qaybqaataan wixii dheeraad ah ee hawlaha dugsiga oo isugu jira imaatinka waqtiyada manhajka dheeraadka iyo casharrada ku saabsan.
- in ay u gudbiyaan waraaqaha, Friday News isla maalintii la soo saaro iwm.
- Waa in ay la hadlaan waaliddiinta iyo macallimiintooda wax alla oo walaac ah kuna saabsan iskuulka.
- Arday walba waxaa waajib ku ah ilaalinta sharciga ammaanka elektaroonikada ah eek u qoran (e-Safety Policy) fasallada ICT-ga iyo website-ka iskuulka.
- Waa in ay sheegaan wixii cabsi leh ee ku saabsan ammaanka iyo anshaxa ardayda kale.
- In uu sameeyo wax kastoo suurtagal ah sidii loo horumarin lahaa xiriirka wanaagsan ee iskuulka iyo guriga ka dhaxeeya.

Arrimaha ku saabsan isticmaalka IT systemka iskuulka ardayda waa:

- In ay hubiyaan ammaanka IT username & password-ka in ay ammaan yihiin una qarsoonaado, waa in aysan si kastaba la wadaagin qof kale ayna isticmaalin username iyo password qof kale leeyahay.
- Waa in aysan qofna u sheegin ama la wadaagin macluumaad shaqsiyeedkooda ama ku saabsan dadka kaleba marka ay online ku jiraan.
- Waa in ay si dhakhso leh u soo sheegaan wixii xun ama aan habboonayn sidoo kale fariimo ama wax kastoo kale oo ay u arkaan inuu hagaagsanayn; haddii ay ku arkaan online.
- Waa inaysan shakhsi ahaan u Isticmaalin System-ka dugsiga ama madadaalo ahaan (oo ay ku jiraan email) ilaa ay oggolaansho u heystaan.
- Waa inaysan u isticmaalin System-ka ama qalabka dugsiga ciyaaraha on-line-ka, khamaarka on-line, shopping-ka internetka, share-gareynta faylasha, ama baahinta video-ga (sida ; YouTube) haddii aysan ogolaansho heysanin.
- Waa inuusan gelin ama koopigareysanin, ama ka saarin, ama uusan wax ka bedelin faylasha dadka kale leeyihiin, iyadoo uu mulkiilaha ka warhaynin ama aan ogolaansho ka helin mulkiilaha.
- Waa in si akhlaaq leh, oo mas'uul ah marka ay dadka kale la xiriirayaan.
- Waa in aysan fasax la'aan qaadanin ama qaybinin sawir qof kale leeyahay.
- Waxay isticmaali karaan dugsiga gudihiisa aaladahooda shakhsiyeed (sida telefoonada gacanta, aaladaha USB iwm); keliya marka ay oggolaansho heystaan ; waana in uu ahaadaa mid waafaqsan sharciga dugsigan.
- Waa in ay isku dayin inay geliyaan, download-gareeyaan ama ay galaan macluumaad kastoo sharci darro ah ama aan habboonayn ama waxyeeleyn kara ama u keeni kara dadka kale cidhiidhi.
- Waa inaysan isku dayin in ay isticmaalaan wax program ah ama software laga yaabo in uu ii oggolaanayo inaan garab maro nidaamka shaandheynta ama dhibaato u geystaan ama ay carqalad ku timaado system-ka iskuulka.
- Waa in isla markiiba ay soo sheegaan wixii waxyello ah ama cillad ku timaada qalabka ama software-ka
- Waa in aysan faraha la galin, gooynin, isku dayin in uu dayactiro ama uu dhaawaco qalabka dugsiga
- Waa in aysan soo dejinin ama isku dayin in ay soo dajiyaan ama ku keydiyaan qalabka dugsigan program kasta noocuu doonaba ahaadee. ama isku dayi doonnin in ay wax ka beddelaan koombuyuutarka.
- Waa in ay isticmaalaan oo kaliya goobaha warbaahinta bulshada (social media) marka ay oggolaansho heystaan waqtiyada la oggol yahay oo keliya.
- Waa in ay hubiyaan in ay fasax u heystaan inay isticmaalaan shaqo original ah ee dadka kale ay leeyihiin oo u gaarka ah.
- Waa inay aysan isku dayi doonin inay soo dejistaan shaqo la ilaaliyo copyright si aan sharci ahayn (oo ay ku jiraan music iyo videos).

Si loo gaaro natiijada ugu wanaagsan ee ardayda waxa waalidiinta oggolaadeen :

- In ay taageeri doonaan nidaamka (School Policy) dugsiga u degsan
- In ay si firfircoon u xiisaynayaan ka qaybqaadashada dhammaan dhinacyada nolosha dugsiga carruurtooda.
- in ay arkaan in carruurtooda si joogta ah u yimaadaan dugsiga waqtigii loogu talagalay iyagoo si fiican u qalabeysan.
- In ay dugsiga kala soo xiriiraan dhamaan macluumaadka khuseeya carruurtooda oo saamayn ku yeelan kara hawlaha iyo waxbarashadooda
- In ay School-ka soo ogeysiiyaan, sabab kastaba ha ahaatee, in carruurtooda aysan shool-ka iman karin
- In ay hubiyaan in carruurtooda ay la socdaan nidaamka anshaxa dugsiga iyo taageeridda wixii talaabo ficileed ah ee la xiriira.
- Ku dhiirigelinta waxbarashada dugsiga ka baxsan, una fududeeyaan siismada qalabka ku habboon si ay wax u bartaan, kuna dhiirigeliyaan ilmahoodu in ay la yimaadaan niyad waxbarasho wanaagsan.
- Ka qaybgalidda habeenka waaliddiinka (parents' evenings), shirarka taageero ee ardayga iyo munaasabooyin kale ee joogitaanka waalidku ay lagama maarmaan tahay.
- In ay sameeyaan kasta oo suurto gal ah si kor loogu qaado xiriirka wanaagsan ee u dhexeeya guriga iyo iskuulka.

Si loo gaaro natiijada ugu wanaagsan ee suurto galka ah ee ardaydeena wuxuu iskuulka :

- U fidinayaa carruurtiina jawi ammaan ah iyo deegaan raaxo leh.
- U bixinayaa manhaj ballaadhan oo isku dheeli tiran dhammaan ardayda awood kasta oo ay kala leeyihiin.
- U dhiiri geliyo ardayda oo dhan in ay qaadaan masuuliyadda waxbarashadooda, ayna dareemaan guulaha ay ku faanayaan ayna ku faraxsan yihiin in ay ka mid yihiin ardayda dugsiga.
- In uu dugsiga kula socodsiiyo horumarka ilmahaaga iyo guud ahaan arrimaha dugsiga.
- Inuu iskuulka ku adkeysto in dhammaan ardayda ay dhowraan siyaasadaha anshaxa iskuulka iyo ka-hortagga dulmiga xoogsheegashada ah.
- In uu si joogta ah u soo siiyo homework iyo in iskuulka laga siiyo wixii tas-hiilaad ee ku haboon.
- In uu qiimeeyo shaqada ardayda iyo in uu siiyo target joogto ah iyo haggis ama talo bixin ku saabsan sidii loo sii wanaajin lahaa.
- Inuu sameeyo wax kasta oo suurto gal ah si kor loogu qaado xiriirka wanaagsan ee u dhexeeya guriga iyo dugsiga.

Waxaan ku raacsanahay inaan dhowro oona taagero Heshiiska Slough & Eton Church of England Business & Enterprise College.